



## Baaritaanka Myocardial Perfusion ee Leh Mashiinta Orodka ee Treadmill- Baaritaan Socda Labo Maalin

Bukaanka: \_\_\_\_\_ Taariikhda Balanta: \_\_\_\_\_

Waqtiga Imaanshaha: \_\_\_\_\_ subaxnimo/galabnimo-Maalinta 1 Xiliga Baaritaanka: \_\_\_\_\_ subaxnimo/galabnimo

Waqtiga Imaanshaha: \_\_\_\_\_ subaxnimo/galabnimo-Maalinta 2 Xiliga Baaritaanka: \_\_\_\_\_ subaxnimo/galabnimo

Goobta: Daawada Nukleerka ee Mankato Clinic  
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

### Fadlan soomar Xafiiska Diiwaangalinta kahor intaadan imaan barta Daawada Nukleerka.

Hadaadan awoodin inaad balanta ku timaado ilaaliso ama aad qabto wax su'aalo ah, fadlan wac 507-389-8519.

### Waa maxay Baaritaanka Myocardial Perfusion:

Sawirka Myocardial Perfusion oo wata jimicsi waa baaritaan loo adeegsado cadad yar oo radioactive ah kaasoo leh aalad sawirada qaada si loobaaro qulqulka dhiiga ee muruqyada wadnaha marka uudegen yahay iyo markuu kacsanyahay. Sawiro ayaa lagaso qaadaa markuu wadnuhu degan yahay kadibna sawiro kale ayaa laqaadaa markuu qofku jimicsi orodka ah usameeyo mashiinka treadmill. Sababaha looqaadaayo baaritaanka Myocardial Perfusion waxaa kamid ah: in labaaro shaqada guud ee muruqyada wadnaha, in labaaro dhaawaca gaaray wadnaha kadib markuu wadne garaac kugu dhaco, iyo in lagaa baaro astaamaha kansarka sida xanuunka xabadka iyo neefta oo kugu yaraata.

### Sidee ayaan ugu diyaar garoobayaa baaritaanka:

- Baaritaankaan labo maalin ayuu socdaa
- Kahor intaadan qabsan mudada baaritaankaaga, fadlan usheeg dhakhtarkaaga hadaad:
  - Naas nuujinayso, aad uur leedahay ama aad umalaynayso inaad uur qaadi karto.
  - Sonkoroow qabto. Dhakhtarkaaga ayaa kusiinaaya tilmaan ku aadan qaadashada daawoyinkaaga sonkoroowga.
  - Usheeg dhakhtarkaaga hadaad soomartay iskaanka PET/CT 48 saacadood ee ugu danbaysay.
- Waxaan soojeedinaynaa inaad laxariirto shirkadaada caymiska kahor intaadan balansan baaritaanka si aad ufahanto waxa caymiskaagu kaabixin karo baaritaankaan.
- **Maalinta 1:** Maalinta baaritaanka: (Hal saac sii baaritaanka)
  - Keen liiska qoran ee dhamaan daawooyinka aad qaadata. Xaqiiji inaad sooraaciso daawooyinka lagu qoray, kuwaad dukaanada ka iibsatay, kuwa dhaqanka iyo maadooyinka dabiiciga ah. Hadaad isku aragto qufac xiliga baaritaanka, fadlan soqaado daawada bootarka/dareeraha ah ee qufaca.
  - Hakuxiran wax bir leh jirka ka koreeya sinaha.
- **Maalinta 2:** Maalinta baaritaanka: (Hal 2 saac sii baaritaanka)
  - Hacunin nicotine muddo 24 saac ah kahor baaritaanka. Waxaa kamid noqon kara maadooyinka suntaan leh sigaarka, duubabka nicotine ta, cunista tubaakada iyo sigaarka korontada kushaqeeya.
  - Hacunin hana cabin wax kakooban caffeine mudo 24 saac ah kahor baaritaanka. Maadooyinka waxaa kamid ah qaxwada caffeine ta laga miiray iyo dhamaan noocyada shaaha, soodhada, cuntada shukulaatada, Anacin® iyo Excedrin®.
  - Hacunin hana cabin waxba muddo 6 saac ah kahor baaritaanka. Waxaad daawadaada kucuni kartaa cadad yar oo biyo ah.
  - Wax kareeno ah hamarsan jirka (dufanka ECG hamarsanin sidoo kale).
  - Raac tilmaamaha ee dhakhtarkaagu kusiiyay kuwaasoo laxariira daawooyinkaaga. Fadlan akhri bogga lifaaqa kujira ee kahadlayaa tilmaamaha gaarka ah ee daawada. Keen liiska qoran ee dhamaan daawooyinka aad qaadata. Sooqaado daawo kasta oo neefta aad udhuuqdo taasoo aad sijoogto ah u isticmaasho. Hadaad isku aragto qufac xiliga baaritaanka, fadlan soqaado daawada bootarka/dareeraha ah ee qufaca..
  - Hakuxiran wax bir leh jirka kakoreeya sinaha. Xiro maryo jilicsan, oo raaxo leh iyo kabaha lagu socdo. Waxaan lagaa codsanayaa inaad dharka kasaarto qaarkaaga hore ilaa araxda. Haweenka waxaa loosheegayaa inay xirtaan rajabeetada ciyaaraha waxayna soo qaadanayaan saako si ay uxirato inta baaritaanku socdo.

# Baaritaanka Myocardial Perfusion ee Leh Mashiinta Orodka ee Treadmill- Baaritaan Socda Labo Maalin

## Waxa dhacaaya inta baaritaanku socdo:

- Baaritaankaan labo maalin ayuu socdaa
- **Maalinta 1:**
  - Khabiirka raajada ayaa galinaaya cirbad xididka (IV) garabkaaga ama gacantada. Waxaa lagu siinayaa maado lagugu diraayo oo ay kujirto radioactive kaasoo lagaaga duraayo tuubada IV.
  - Waxaad dhabarka ugu jifanaysaa miiska raajada. Sawiro ayaa lagasoo qaadayaa wadnahaaga ayadoo la adeegsanaayo kaamiro qaas ah. Shaqadaan waxay qaadanaysaa 25 daqiiqo. Waa inaad si dagan ujiiftaa inta sawirada laqaadaayo.
- **Maalinta 2:**
  - Khabiirka raajada ayaa galinaaya cirbad xididka (IV) garabkaaga ama gacantada.
  - Waxaad galaysaa shaybaarka wadna garaaca lagu cabiro si baaritaanka qaybta kale ugu gasho. Kalkaalisoo ama khabiir dhanka isku buuqa ah ayaa xabadka kaamarinaaya ECG qalabka cabira cadaadiska dhiigana kaaga xiraaya gacanta. Qalabkaan waxaa loo adeegsanayaa in lagula socodo xaalada inta baaritaanku socdo.
  - Waxaad ku ordaysaa treadmill ka kaasoo xawaarihiisu tartiib usii kordhaayo siina dheeraynaa muddo kadib. Markaad gaarto heerka ugu sareeya ee wadna garaaca da'daaga, waxaa lagugu durayaa qaybta labaad ee radioactive ka. Waxaad kusoconaysaa treadmill ka kudhawaad ilaa hal daqiiqo kadib marka aalada lagugu duro.
  - Kadib marka wadna garaaca lagaa cabiro, wareega labaad ee sawirada ayaa laga qaadayaa wadnahaaga adoo lagu galinaayo qolka aalada nukleerka ah. Sawiradaan waxay qaadanayaan kudhawaad 15 ilaa 20 daqiiqo. Waa inaad si dagan ujiiftaa inta sawirada laqaadaayo.

## Tilmaamaha baaritaankaaga kadib:

- Dhakhtarkaaga ayaa kula wadaagaaya natiijooyinka baaritaankaaga marka lagaaro balantaada dabagalka ah. Hadaadan lahayn balan dabagal ah, dhakhtarkaaga ayaa qoraal kuusoo diraaya waraaq. Haduusan kulasoo xariirin, waxaad laxariiri kartaa xafiiska dhakhtarkaaga kadib shan ilaa todobo maalmood baaritaanka si aad natiijadaada usoo qaadato.
- **Maalinta 1:**
  - IV ayaa lagaa siibayaa.
  - Waxaad dib ugu laaban kartaa hawlahaaga caadiga ah
- **Maalinta 2:**
  - IV ga iyo maadooyinka ECG ayaa lagaa saarayaa.
  - Heerka shaqada: Kadhig heerka shaqadaada sidii dhakhtarkaagu kuusheegay ilaa natiijadu kaagasoo baxdo. Haddii dhakhtarkaagu uusan kusiin tilmaamo laxariira shaqada aad qaban karto, fadlan samee shaqada ugu yar ilaa dhakhtarkaagu kulasoo xariiro asagoo kaaga waramaaya natiijadada baaritaankaaga.